Muhiimada adeega EI/ECSE waa dhisida awoodaha qoyska si ay u buuxiyaan baahiyaha shakhsi ee ilmaha.

Xubnaha qoyska ka tirsan, macalimiinta, daryeel bixiyayaasha waxaa la siiyay nidaamyo ay wax ku baraan ilmaha isagoo ku sugan beey'adaha iyo meelo u gaar ah. Adeegyada waxaa ka mid ah:

- Siinta qoyska macluumaad gaar ah oo ku saabsan daahida korriinka ilmaha;
- Isku keenida waxbarashada ilmaha iyadoo laga dhigayo kuwo hab kaliya u socda;
- Ku xirka qoyska ee ilaha bulshada, sida fasallada; iyo
- Tababarka waalidiinta, qoyska iyo daryeel bixiyayaasha iyadoo la barayo xirfaddaha gaarka si ay taageeraan ilmaha.

Rev. 3/2016

MECP ahaan Waxaan Aaminsanahay:

- Carruurta yar yar ee naafada ah iyo qoysaskoodu in ay yihiin xubno buuxa oo ka tirsan bulshadeena
- Ku daridu waa tiirka wax haga iyo aasaaska adeegyo kala duwan iyo taageerooyin aan bixino.
- Habka waxbarasho ee laga qayb gelinayo carruurtu naafada ah ee meel gaar ah iyo beey'ad waxay dhiiri gelisaa dareemida wax lahaansho.
- Wada shaqaynta dadka hawshu ka dhaxayso sida (tusaale. qoysaska, dhakhaatiirta, takhasusayaasha, iyo maamulayaashu) waa gundhiga fulinta ku darida wakhtiyada hore ee dhallaanka (early childhood inclusion) oo tayadeedu sarrayso.
- Adeegyada gaarka ah iyo daawaynta waa in loo qabtaa hab isku mid ah iyadoo lala midaynayo waxbarashada hore ee dhallaanka.

MECP waxay raacdaa Qeexida Ku darida Wakhtiyada Hore ee Dhallaanka ee DEC/NAEYC

Ku darida Wakhtiyada Hore ee Dhallaanka (Early Childhood inclusion) waxay qiime u yeeshaa tayada, siyaasadaha, iyo nidaamyada taageera xuquuqda uu ilme kastaa leeyahay iyo ilmaha yar iyo qoyskiisa ama qoyskeeda, iyadoon aan la eegayn awooda loo leeyahay, ka qayb qaadasho ee waxyaalaha kala duwan ee la qabanayo iyo sida ay yihiin xubnaha buuxa ee qoysku, bulshadu, iyo dadweynahu. Natiijada la doorbidayo ee waayo aragnimada laga helayo ku daridu carruurta aan naafada ahayn iyo kuwa naafada ah iyo qoysaskooda waxaa ka mid ah dareen wax lahaansho iyo ka mid ahaansho, xiriir bulsho oo wanaagsan iyo saaxiibtinimo, iyo horumar iyo; barashada gaarida awoodooda oo buuxda. Qaabka gaarka ah ee ku darida waxaa loo isticmaali karaa in lagu aqoonsado barnaamijyada loogu tala galay wakhtiyada hore ee dhallaanka oo tayadooda sarrayso iyo adeegyo la heli karo, ka qayb qaadasho, iyo taageero.

DAVID DOUGLAS SCHOOL DISTRICT

Barnaamijka Carruurta Da'da Yar ee Multnomah

Waxaanu bixinaa adeegyada loogu talagalay carruurta marka ay dhashaan illaa ay ka gaaraan shan sano ee qaba xaaladaha la xiriira korriinka.

Adeegyada Waxbarashada Khaaska ah ee Degmada Multnomah ee Ka Hortagga Xilliyada Hore/Carruurta Da'da Yar

Khadka Xiriirinta:
503-261-5535
Fax-ka: 503-894-8229

www.ddouglas.k12.or.us/departments/multnomah-early-childhood/

MECP

MECP waxay bixiyaan adeegyada Ka Hortagga Xilliyada Hore (EI) iyo Waxbarashada Khaaska ah ee Carruurta Da'da Yar (ECSE) oo ay da'dooda u dhexeyso marka ay dhashaan illaa ay ka gaaraan shan sano kuwaasoo qaba xaaladaha korriinka ama kuwa naafada ah.

Yaa tixraac loo samaynayaa?

Ilma kasta, laga bilaabo dhalashada ilaa shan sano, oo laga qabo walwal dhanka korriinka ah waxaa tixraac loogu diri karaa MECP. Dhinacyada uu walwalku ka imaan karo waxaa ka mid noqon kara:

- Hadalka iyo luqadda
- Dhaqdhaqaaqa
- Dabeecada
- Dad dhex galka
- Waxbarashada
- Aragga
- Maqalka

Yaa tixraac samayn kara?

Tixraacyadu waxay ka imaan karaan cid kasta.

Imisa ayuu kharashka noqon doonaa?

Adeegyada oo idil waa kuwo bilaash ah.
Kharashyada baaritaanka iyo qiimeynta waxaa bixinaya maamulka degmada ee dugsigiina. Adeegyada MECP waxaa maalgeliyaan Waaxda Waxbarashada ee Oregon.

Waa maxay nidaamku?

Tixraaca

Kalkaaliya xafiiska wuxuu xag taleefoon ku qaadanaya macluumaadka ku saabsan ilmaha.Turjubaan ayaa la helayaa marka la codsato sidoo kale Tixraacyada waxaa lagu soo diri karaa fax ahaan.

Baaritaanka

Iyadoo ay ku xiran da'ada ilmaha, qalabka waxa lagu baarayo, sida ASQ iyo ASQ-SE ayaa suuragal ah in loo isticmaalo baaritaanka korriinka ilmaha. Qalabka baaritaanka waxaa buuxin kara waalidka ama waxaa gudbin kara hay'ad tixraac leh. Haddii baaritaanku muujiyo in ilmuhu leeyahay daahid dhanka korriinka ah, qiimeyn ayaa markaa lagu talinayaa.

Qiimeynta u Qalmidda

Khabiirro aqoon u leh ayaa qiimeyn ku sameyn doono korriinka ilmaha ee meelaha la daneynayo. Waxaa dadka qiimeynta sameynaya ka mid noqon kara Macallimiinta Waxbarashada Khaaska ah, Khabiirrada Hadalaka iyo Luqadda, Khabiirrada Caafimaadka Jidhka, Khabiirrada Hawl Qabadka iyo Takhaatiirta Caafimaadka Maskaxda.

U qalmidda

Natiijada qiimeynta waxaa lagu wadaagayaa kulanka kooxda. Haddii ilmuhu u qalmo, balanta kulanka Qorshaha Adeega Qoyska u Gaarka ah (IFSP) ayaa la qaban doonaa. Haddii aanu ilmuhu u qalmin adeegyada kooxdu bixin doonaa macluumaad ku saabsan ilaha bulshada.

Gaarka ah ee Adeegga Qoyska

Haddii uu ilmuhu u qalmo adeegyada, kooxda ayaa si wadajir ah u wada shaqayn doonta si ay u qoraan ujeedooyinka ay leeyihiin si ay u tilmaamaan baahida ilmaha iyo muhiimadaha qoyska. Qorshahan waxaa loo yaqaan IFSP. Waxaa dib loo eegay ama lagu noqday ugu yaraan hal mar sanadkii. Kooxdu waxay markasta ka qayb galiyaan waalidiinta, EI/ECSE daryeel fidiyayaasha, iyadoo ay ku jiri karaan dad kale.

Adeegyada

Iyadoo ay la xiriirto ujeedooyinka lagu ogaaday kulankii IFSP, waxaa suuragal ah in ay adeegyada ku jiraan waxyaalo ka kooban kuwa soo socda:

- Waxbarashada/la talinta waalidka
- Daryeelka ilmaha/ tala siinta dugsiga ka hor
- Adeegyada hadalka iyo luqadda
- Adeegyada dhaqdhaqaaqa jirka iyo isticmaalida gacmaha
- Adeegyada aragga/maqalka
- Adeegyada farsamada gargaarka

Waxaa adeegyada lagu qaban karaa mid ka mid ah meelaha soo socda:

- Guriga
- Xanaanada Carruurta
- Xanaanadaha Bulshada Deegaanka
- Fasallada Sida Khaaska ah u Sameysan
- Xarumaha hadalka
- Goobaha kale ee bulshada
- Hore u Bilowga